

## Ogolaanshaha faahfaahsan ee Adeegyada Caafimaadka Khadka

Aniga oo ah, \_\_\_\_\_ (magaca bukaanka), waxaan halkaan ka ogolaanayaa in la siiyo adeegyada caafimaadka khadka oo ay bixiyaan Adeegyada Dhalinta iyo Qoyska ee Waqooyi Bari (NYFS) kuwaasoo qayb ka ah daawayntayda dhimirka. Waan fahmayaa in caafimaadka khadka ay ku jiraan adeegga bixinta daryeelka caafimaadka, baaritaanka, talo bixinta, daawayn, isdhaafsiga xogta caafimaadka iyo waxbarashada ayadoo la adeegsanaayo cod ama muuqaal la isdhaafsanaayo.

Dhammaan adeegyada caafimaadka khadka waa inaan ku helaa gudaha gobalka Minnesota si loogu dhaqmo sharciyada la xiriiira ilaalinta sirta. Dhakhtarka daawaynta ayaa igu siin doona adeegyada goob gaar ah, oo qarinqaysa sirtayda.

Qasab maaha in dhammaan macaamiishu awoodi doonaan adeegsiga adeegyada caafimaadka khadka. Kahor qaadashada adeegyada caafimaadka khadka, in adeegyadu qofka ku haboon yihiin ayaa la qiimeeyaa. Qiimayntaan waxaa ku jiri doona helitaanka tignooloojiyada iyo goob gaar ah oo qofku adeegyada uga qaybgalo, heerka khatarta, iyo awooda ka qaybgalka buuxa ee adeegga. Haddii loo arko in adeegyada caafimaadka khadku aysan kugu haboonayn, balamaha aad tooska u imaanayso ayaa lagu siin doonaa. U qalmidaada adeegyada caafimaadka khadka ayaa dib loo qiimeyn doonaa marka isbadello dhacaan.

Macaamiisha ayaa leh xuquuqaha soo socda ee la xariira caafimaadka khadka:

- Waxaad codsan kartaa inaad toos ula kulanto dhakhtarka marka aad doonto
- Isla xuquuqda qarinta sirta iyo xadidaadaha ayaa qabanaaya caafimaadka khadka si lamid ah kan tooska loo tagaayo.
- Inkastoo la samaynaayo dedaalo kasta oo ay awoodo wakaalada iyo dhakhtarku haddana waxaa jiro khataro la xariira caafimaadka khadka ayna ku jirana fashil dhanka farsamada ah iyo gelitaanka sharci darada ah ee xogta caafimaadka.
- Natiijooyinka caafimaadka khadka ayaa noqon kara ama aan noqon karin kuwo waxtar leh si lamid ah baxnaaninta tooska ah, sidaas awgeedna waxtarka daawaynta noocaan ayaa si goos-goos ah loo qiimayn doonaa.

Habraaca soo socda ayaa loo adeegsan doonaa xalinta dhibaato inta lagu jiro kulanka dhakhtarka:

- Biloowga kulan kasta, dhakhtarka ayaa codsan doona xaqiijinta muuqaalka iyo goobta rasmiga ah ee macmiilka. Dhakhtarka ayaa qoran doona goobta haddii ay ka duwan tahay guriga rasmiga ah ee ku qoran diiwaanka macmiilka.
- Haddii uu jiro walaaca waxyeelada nafta uusana dhakhtarku awoodin inuu xal u helo walaaca dhakhtarka ayaa la xariiri doona qofka xaalada degdega ah la wacaayo ee macmiilka si loo sameeyo wada sheekaysi sadex geesood ah, hddii ay suuragalayso. Dhakhtarka ayaa iskudayi doona inuu macmiilka khadka ugu jiro ilaa qofka xaalada degdega ah wicitaanka soo galaayo.
- Haddii aan ofka xaalada degdega lala xiriiiraayo la heli karin, ama ciladu sii jirto, markaas codsiga hubinta faya qabka qofka ayaa loo dirayaa booliiska. Haddii dhakhtarku ka baqo waxyeelo degdeg ah, wuxuu wacayaa 911 si loo helo gurmada u dhow macmiilka.
- Haddii macmiilku jaro wicitaanka dhakhtarka ayaa wacaayo qofka lala xiriiiraayo xaalada degdega ah markay jirto, haddii uu ka baqo waxyeelo degdeg ah, wac 911 si loo helo gurmada u dhow macmiilka.
- Dhakhtarka ayaa xaqiijin doona in dhammaan macaamiisha la siiyo ilaha xariirka masiibada marka la diiwaan gelinaayo (Laymanka Gurmada Masiibada ee Degmada, isbitaallada maxaliga ah, 911), iyo markale haddii macmiilku waajahaayo dhibaatooyinka badqabka inta u dhexaysa kulannada dhakhtarka.

Fadlan buuxi bogga danbe ee xaashida oo saxiix.

Si loo qiimeeyo u qalmida adeegyada caafimaadka khadka fadlan kajawaab suaalahaan soosocda:

**Tignooloojiyada:**

Ma haysataa kumbuyuutar/aalad leh interneed taasoo leh baroowsarka webseedka oo cusub?

- Haa
- Maya

Ma haysataa ciwaan iimeel oo aad ku qanacsan tahay isticmaalkiisa?

- Haa
- Maya

Ma ku qanacsan tahay adeegsiga caafimaadka khadka si aad u hesho adeegyada baxnaaninta?

- Haa
- Maya

Ma haysataa goob dhawraysa sirtaad oo aad ku hesho caafimaadka khadka mase awoodaa inaad tijaabiso tayada kumbuyuutarkaaga/khadka interneedka?

- Haa
- Maya

Waxaa jirta suuragalnimo ah in carqalado dhanka tignooloojiyada ah dhacaan inta kulanka lagu jiro. Ma aaminsan tahay in adeegsiga tignooloojiyadu kugu abuurayso walaac dheeri ah halkii ay kaa caawin lahayd?

- Haa
- Maya

**Gobalka/Goobta:**

Ma joogi doontaa gobalka Minnesota marka aad adeegyada helayso?

- Haa
- Maya

Adeegyada xaalada degdega ah ma heli kartaa?

- Haa
- Maya

Magaca Isbitaalka \_\_\_\_\_

Lambarka taleefanka \_\_\_\_\_

Xariirka xaalada degdega ah oo laga heli karo kulanka \_\_\_\_\_

Lambarka taleefanka qofka lagala xariiraayo xaalada degdega ah \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_  
Magaca Qoran

\_\_\_\_\_  
Taariikhda

\_\_\_\_\_  
Saxiixa Bukaanka ama Wakiilka Gaarka ah

\_\_\_\_\_  
Xiriirka Wakiilka